Af-soomaali صومالية

# Sakadu waa labo qaybood

**Sunne:**
waana maal kasta oo uu qofku bixiyo, iyada oo ay ka tahay cibaado barax la'.

**Faral:**
Waana labo nooc

## Sakada Jidhka:

Waana sakada Afurka, waxayna waajib ku tahay qof kasta oo Muslim ah: yar iyo weyn, lab iyo dheddig, addoon iyo xorba.

## Sakada maalka:

Sharci ahaan waxaa lagu qeexaa: in Alle lagu caabudo saaridda (bixinta) qayb sharci ahaan ku waajibtay hanti gaar ah, iyadoo la siinayo cid gaar ah. Waana tiirka 3aad ee tiirarka Islaamka

waxayna u qaybsantaa afar qaybood:

**1 Labada lacagood**



dahabka iyo qalinka, iyo wixii booskooda geli kara oo lacag iyo qayrkeedba ah.
Nisaabka dahabka ay sakadu ka waajibto waa 20 misqaal (85g). siaabka qalinkuna waa: 200 dirham (595g).

**2 Xoolaha foofa**



waana xoolaha daaqa wax xalaal ah sannadka badankiisa ama dhammantii, waxaana loola jeedaa nimcoolayda: geela, lo'da iyo ariga.

**3 Wixii dhulka ka soo baxa**



oo iniinyo iyo miro ah.

**4 Waxyaabaha laga ganacsado**



waana wax kasta oo loo diyaariyay iibin ama iibsasho.

## Dadka Sakada iska leh:

**1 Fuqarada**
waa baahi-qabayaasha aan helayn waxba, ama helaya wax aanan ku filnayn.

**2 Masaakiinta**
waana kuwa helaya wax ku filan ama badhkii. Hadaan ka soo qaadno baahida hal sano tusaale ahaa (12,000) faqiirku waa ka heli kara (lix kun) ama waxba. Miskiinkuna waa ka heli kara lix kun ama ka badan laakiin aan gaarsanayn (12,000), waayo miskiinka iyo faqiirka waxaan siinaynaa wax ku filan hal sano, maadaama ay sakadu sanadkii ay hal mar waajibto

**3 Kuwa sakada ka shaqeeya**
aruuriyeyaasha, dhawrayaasha iyo qaybiyeyaasha sakada. Madaxa Muslimiinta ayaana u dhiibaya hawsha, loomana shardiyo inay fuqaro yihiin, waana la siinayaa hantiileyaalba ha ahaadaane.

**4 Kuwa qalbiyadooda la soo dhawaysanayo**
waana kuwa laga rajo qabo inay islaamaan, ama sharkooda la iska qabto, ama iimaankooda la xoojiyo.

**5 Furashada qooraha (Xorayn)**
waana:
1.Mukaatabka Muslimka ah.
2.Xoraynta addoonka Muslimka ah.
3.Soo daynta qafaalanaha Muslimka ah.

**6 Dayn-qabayaasha**
waana:
1.Dayn-qabe u daymoobay heshiisiinta dadka.
2.Qof naf ahaantiisa u daymaysan.

**7 Jidka Alle**
wuxuuna kulansanayaa kuwa duula iyo waxa ay u baahan yihiin oo hub iyo waxa la midka ah.

**8 Musaafirka (Taraagaha)**
waana ruuxa safarka ku jira ee ay sahaydii ka go'day, waxaana sakada laga siinayaa wax gaarsiin kara Meesha uu u socdo.